


Faafitaanka calaamadaha COVID-19 ee bulshada Soomaaliyeed dhexdeeda waxaa loo badinayaa inuu aad uga bato qiimeynadii horay loo sameeyay

Daraasada waxaa lagu soo uruurshay xog ku saabsan calaamadaha dadku iskood usoo tebiyeen inay qabaan ee COVID-19 waxaana lagu soo ogaaday in 5% ay isku arkeen labo ama in kabadan oo ah calaamadaha 14 maalmood oo ay isu jireen calaamaduhu midba mid. Calaamadaha ugu badan ee lasoo tebiyay waxaa kujira “qufac cusub ama kasii daraya” (38%) iyo “dareemida qandho” (30%).



Macluumaadka baaritaanka oo lasoo uruurshay Juun-Luulyo 2020

Liiska calaamadaha waxaa xogta siiyay cabbirka wax lagu saleeyo ee Xarumaha Koontaroolka iyo Kahortagga Cudurada (CDC) waxaana lagu daray: qufac cusub ama kasii daraya, neefta oo gaaban, sanko oo xirma, dhuunta oo xanuunta ama wax liqidda oo dhib noqota, wax urinta oo lunta, dhadhanka oo luma, shuban, lalabo ama mantag, murqa xanuun, qandho la xaqiijiyay (37.5°C iyo ka badan), iyo in qofka ka jawaabaya su'aalaha “uu dareemay qandho.”